# Fahanka Gu'ga Ardaygaaga 2025 ee Maine ayadoo la Adeegsanaayo Warbixinta Buundada Imtaxaanka

## Cabirka Buundada Maine

Jaantusyada midabka leh, ee jiifa ee ku qoran warbixinta ardaygaaga ayaa muujinaaya buundada heerka ardaygaaga ee Maine. Buundadaan ayaa cabiraysa dedaalka ardaygaaga ee ku aadan imtaxaankaan ayadoo laga eegaayo xirfadaha muhiimka ah ee akhriska iyo xisaabta ee heerka fasalkiisa marka loo eego Heerarka Buundada Guud ee Gobalka.

Imtaxaanka akhriska ee fasalka 8-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Tixraaca tooska ah ee qoraalka si looga jawaabo su'aalaha ku saabsan sheekooyinka, ciyaaraha, gabay-yada, iyo qoraalka xogta.
- Qiimeynta sida wada hadalka iyo dhacdooyinka ku jira sheeko ay u hagayaan qaybta ama xog uga bixinayaan jileyaasha.
- Go'aaminta fikirka qoraaga iyo ujeedada.
- U adeegsiga mawduuca, asalka erayada, biloowga erayada, hooriska, iyo tixraaca si loo go'aansho macnaha erayada.

Imtaxaanka xisaabta ee fasalka 8-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Qorista, suuraynta, iyo ka jawabida su'aalaha iyo nidaamyada su'aalaha xisaabta.
- Fahanka nuqullada iyo u adeegsigooda si loo muujiyo xiriirada u dhexeeya cadadyada.
- Qiimeynta qaababka 2D iyo 3D ayadoo la adeegsanaayo badka, xagallaha, sinaanta, iyo iswaafaqida.
- Fahanka iyo adeegsiga Qaacidada Pythagorean si loo raadiyo dheerarka geesaha.

Cabirka Buundada Maine ayaa la xiriirta heerka guusha oo qeexaaya sida waxqabadka ardaygu u waafaqsan yahay himilooyinka gobalka. Heerarka guusha ayaa Aad uga Hooseeya Filashada Gobalka, Ka Hooseeya Filashada Gobalka, Ku siman Filashooyinka Gobalka, iyo Ka Sareeya Filashooyinka Gobalka.

## Aalada Fahanka Heerka Guusha

Aalada Fahanka Heerka Guusha ayaa ku siinaysa xogta faahfaahsan ee heerarka gaarka ah ee waxbarashada oo lagu qiimeynaayo heerka fasal kasta iyo sida heerarkaan loogu kala qaybiyo xirfadaha kaladuwan ee heerka kasta oo guusha kamid ah.

*Hel Aalada Fahanka Heerka Guusha*